



Qiyaas limaan Wanaagsan

Waxaad xaq u leedahay inaad heshid Qiyaas limaan Wanaagsan (GFE) oo sharaxaysa waxa uu ku kici doono qarashka caafimaadkaada, kahor inta aadan helin shey ama adeeg. Bukaanaada ayaa xaq uleh iney codsadaan Qiyaas limaan Wanaagsan kuwaas oon haysan caymis caafimaad ama kuwaas oon isticmaaleynin caymis caafimaad sida ey qabto Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadamiga, Xarunta Adeegyada Medicare & Medicaid iyo Xarunta Kormeerka Xogta iyo Caymiska Macmiilka. Bukaanaada ku jira barnaamijyada daryeelka caafimaadka federaalka uma qalmaan iney helaan GFE, maadaama ey jirto shuruuc ilaalineed oo hoos yimaada barnaamijyadan.

Qiyaasta limaanka Wanaagsan waa qiyaas waana la bedeli karaa. Waxaad GFE-ga u heli kartaa isugeynta qaraashka la filayo oo ku aadan shey ama adeeg walbo oo aan emerjensi eheyn. Xogta ku xusan GFE-ga waa qiyaas uun mana ahan isugeynta qarashaadka guud ee kama dambayska ah. Sheyaasha iyo/ama adeegyada dheeriga ah oo uu ku taliyo adeeg bixiyaha, ka qeyb ahaan xiliga daryeelka ama kuwaas oo u baahan jadwalayn gooni ah kuma xusna Qiyaasta limaanka Wanaagsan.

Bukaanadeena waxey xaq u leeyihiin iney rajeyaan Qiyaas limaan Wanaagsan qoraal ahaan ugu yaraan hal maalin shaqo kahor adeeg/alaabtaada caafimaad. Waxaad sidookale na waydiisan kartaa (iyo adeeg bixiye kasta oo kale oo aad doorbidatid) Qiyaas limaan Wanaagsan kahor inta aadan jadwalaysan balan ah adeegyo daryeel caafimaad.

Waxaad xaq u leedahay inaad bilawdid habraaca dood xalinta adeeg-bixiyaha bukaanka haddii qarashaadka dhabta ah ee lasoo rugey uu \$400 ka badanyahay qarashaadka la rajeyey oo ku jira Qiyaasta limaanka Wanaagsan. Qiyaasta limaanka Wanaagsan ma ahan qandaraas kumana shuruudeysana in qofka aan caymiska ku jirin ama shakhsi-iska-bixiyaha ah uu sheyaasha ama adeegyada ka helo adeeg-bixiye ama xarun uun ku xusan GFE-ga.

Su'aalo ama wixii macaluumaad dheeri ah oo ku saabsan xaqaada Qiyaas limaan Wanaagsan, booqo www.cms.gov/nosurprises ama ka wac 216-446-6232.

Afeefka Qiyaasta limaanka Wanaagsan

Qiyaastan limaanka Wanaagsan waxey muujineysaa qarashaadka sheyaasha iyo adeegyada kuwaas oo macquul gal ahaan loo rajeyn karo baahiyahaada daryeelka caafimaad ee ku aadan shey ama adeeg. Qiyaasta waxey ku salaysantahay xog la yaqaaney xiliga qiyaasta la samaynayey oo lagu saleeyey sababtaadi hore ee booqashada.

Qiyaasta limaanka Wanaagsan kuma jirto qarashaad walba oon la ogeyn ama la rajeyn kuwaas oo soo bixi kara xiliga daaweynta. Qarash dheeri ah ayaa laguug soo dalaci karaa haddii caqabado ama daruufo gaar ah dhacaan.

[Haddii laguugu soo dalaco wax ka badan Qiyaastaada limaanka Wanaagsan, waxaad xaq u leedahay inaad muran galisid qarashka.](#)

Waxaad la xiriiri kartaa daryeel-bixiyaha caafimaadka ama xarunta la liis gareeyey si aad ugu sheegtid in qarashka lasoo dalacey uu ka badanyahay Qiyaasta limaanka Wanaagsan, haddii qarashka uu soo saarey daryeel-bixiyahaaga caafimaad uu ka badanyahay \$400 midka Qiyaasta limaanka Wanaagsan. Waxaad waydin kartaa iney cusbooneysiyaan qarashka si uu ula ekaado midak Qiyaasta limaanka Wanaagsan, waydii inaad kala niqaashid qarashak, ama waydii haddii gargaar lacageed uu jiro.

Waxaad sidookale habraac qaraar doodeed la furi kartaa Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadamiga ee Maraykanka (HHS). Haddii aad doorbidid inaad isticmaashid habraaca qaraar doodeedka, waa inaad habraaca dooda bilowdaa 120 maalmaha calendarka gudahood (abaare afar bilood) ee maalinta qarashka asalka soo baxo.





Adeegyo Caafimaad

Waxaa jirta ujiiro \$25 ah oo lagu isticmaalo habraaca dooda. Haddii hayada eegeysa doodaada adeeg-bixiye ey kuugu raacdo, waa inaad bixisaa qiimaha Qiyaastan limaanka Wanaagsan. Haddii ey hayadu kuugu raaci waydo oo ey ku raacdo daryeel-bixiyaha caafimaadka ama xarunta, waa inaad bixisaa qiimaha sare.

Si aad wax badan uga baratid oona u heshid foom si aad habraaca u bilawdid aad www.cms.gov/nosurprises ama ka wac Waaxda Biilasha Planned Parenthood 216-446-6232.

Wixii su'aalo ama xog dheeri ah oo ku saabsan xuquuqdaada Qiyaasta limaanka Wanaagsan ama habraaca dooda, booqo www.cms.gov/nosurprises ama ka wac Waaxda Biilasha Planned Parenthood 216-446-6232.

